



**La Xidhiidh**  
Etnisk Ressourceteam

**Xidhiidhiye**  
Naveed Baig  
Tilifon: 2569 9569  
Shaqada: 3545 4206  
naveed.baig@regionh.dk

**Kalkaaliyaal arday ah**  
Dalia Francies Al Maleh  
Dalm0013@regionh.dk

**Kalkaaliyayaal  
akademiyiin ah**  
Egil Bargfeldt  
Tilifon 3545 4003  
Ebar0017@regionh.dk

REGION

Wargelinta bukaanka iyo ehelkooda

Etnisk Ressourceteam - Somalisk

Cusbataallada Rigshospitalet  
Herlev iyo Gentofte Hospital  
Bispebjerg iyo Frederiksberg Hospital  
Amager iyo Hvidovre Hospital

Wargelinta bukaanka iyo ehelkooda

## Kooxda hawlwadeenada ajinebiga ee cusbataallada

oo caawiya bukaanka ajinebiga iyo ehelkooda  
iyo weliba shaqaalaha cusbataallada



Ka sii akhri [www.ressourceteam.dk](http://www.ressourceteam.dk)

Ogost 2018

# Kooxda hawlwadeenada ajinebiga ee cusbataallada

**Ma qabtaa dhibaatooyin ama fikrado, aad rabto inaad la wadaagto qof kale, oo garanaya dhaqankaaga iyo/ama luqaddaada, xilqarsiimana leh?**

**Ma rabtaa inaad kala hadasho qof kale mawduucyo ruuxi ama diini ah, intaad ku jirto cusbataalka?**

**Markaas waxa kuu diyaar ah kooxda hawlwadeenada ajinebiga ee cusbataallada (Etnisk Ressourceteam).**

**Muddada aad ku jirto cusbataalka haddaad la kulanto waxyaabo aad fahmi waydo, ama aanad hubin, waxaannu kugu caawin karnaa in laguu faahfaahiyo.**

## Waa ayo Kooxda Hawlwadeennada ajinebigu?

Kooxda Hawlwadeennada ajinebigu waxay ka kooban yihiin 40 isxilqaame, oo rag iyo dumar leh, kalana da' ah, jinsiyadahooda iyo diimahooduna way kala duwan yihiin. Shaqadooduna waa caawimo iyo sabaalayn, iyo inay goobjoog ka noqdaan kulamada ku adag nidaamka caafimaadka deenishka ee khuseeya bukaanka ajinebiga iyo ehelkooda.

Kooxdu waxay ka hawlgalaan cusbataallo badan oo gobolka caasimadda ah: Rigshospitalet, Herlev iyo Gentofte Hospital, Bispebjerg iyo Frederiksberg Hospital, Amager iyo Hvidovre Hospital.

## Muxuu qaban karaa hawlwadeenku?

Hawlwadeenku wuxu hayaa waqti, wuxu rabaa inuu kula joogo kuna dhegaysto. Haddaad u baahan tahay talo ama suaalo lagaaga jawaabo, wuxu intii awooddiisa ah isku deyaa, inuu ku caawiyo.

Hawlwadeenku wuxu diyaar la yahay wadahadal shakhsi ah iyo caawimo, sidoo kale waa saaxiib ku soo booqda, markaad muddo dheer ku jirto cusbataalka. Taas ka sokow waa qof saddexaad oo dhexdjexaadiya/isfahamsiiya qofka buka iyo shaqaalaha cusbataalka, si bukaanku si fiican uga bogto kulamada uu la leeyahay shaqaalaha caafimaadka.

Kooxdu waxay ku xulatay hawlwadeenka bislaantiisa iyo awooddu kula xidhiidhi karo dadka kale, waxana ku waajib ah xilqarsiimo aanu waxba sii gudbin karin.

## Sidaad u helayso, haddaad rabto hawlwadeen?

Haddaad rabto, inaad la hadasho hawlwadeen, la xidhiidh shaqaalaha qaybta, dabadeed iyaga ayaa la soo xidhiidhaya xidhiidhiyaha kooxda hawlwadeenada ajinebiga.

Fadlan u sheeg luqadda aad rabto, inuu ku hadlo hawlwadeenku, ama sidoo kale diintaada.

Haddaad rabto inaad la hadasho imaam, wadaad ama qof kale oo metela caqiidadaada, waannu kuula xidhiidhaynaa.

